



## Dabaaldegga Soonka Bisha Ramadaan 2022

Bisha Abriil 2 keeda, bulshada Muslimiinta ee dunida oo dhami waxa ay u diyaar garoobayaan sidii ay u bilaabi lahaay soonka bisha Ramadaan. Dugsiyada Degmada Dadweynaha Portland iyo arday fara badan iyo qoysaskooduna waxa ay ka qeybqaadan doonaa soonkaasi.

### **Muxuu Ku Saabsan Yahay Damaashaadka Bisha Ramadaan?**

Dabaaldegga ugu horeeya ee loo dabaaldega waa bishii uu ku soo degay Quraanka Kariimka ahi Nabi Maxamed (NNH). Dadka qaangaadhay ee muslimiinta ah waqtigani waa marka ay dib u milicsadaan noloshooda, ay sameeyaan cibaado fara badan iyo inay soomaan qorax soo baxa ilaa qorax dhaca.

### **Goorma ayey bisha Ramadaan bilaabmeysaa iyo goorma ayay dhammaaneysaa?**

Sanadkani waxa ay Ramadaan bilaabmeysaa Abriil 2 keeda iyada oo dhammaan doonto bisha Abriil 30keeda.

### **Waa Maxay Ciidal Fidri?**

Sanadkani Ciidal Fitri ugu waxa ay ku beegan tahay bisha Maayo 1keeda, taasi oo ah maalinta la furayo soonka bisha Ramadaan. Maalintaasi waa maalinta uu si rasmi ah u dhammaanayo soonka bisha Ramadaan.

### **Salaamaha**

Saaxiibadaada muslimiinta waxaad u diri kartaa salaam aad leedahay “Waxaan idiin rajeynayaa Ramadaan Wanaagsan ama Ramadaan Mubaarak”, “Waxaan kale oo aan idiin rajeynayaa Ramadaan Deeqsinimo leh”. Rabitaankani aad u rajeyneyso waxa ay ka mid tahay waqtiyada ruuxiga ah: in la isku dhiirigaliyo in laga qeybqaato sadaqada, in la caawiyo dadka dhaqaale ahaan aad u liita, in la booqdo dadka xanuunsan, iyo iyada oo la qabto camalo fara badan oo wanaagsan intii suurtagal ah inta lagu jiro bisha Ramadaan.

Maalinta ugu dambeysa bisha Ramadaan, waxaa ku xiga maalinta Ciidal Fitriida oo la isweydaarso salaamo iyada oo la isku odhanayo “Ciid Mubaarak”.

### **Marka La Joogo Iskuulka:**

- Waxaa suurtagal ah in ardayda iyo shaqaalaha laga dhaafi karo hawlaha si ay u tukadaan. Salaadaasi ay tukanayaan waxa ay qaadan kartaa 5 daqiiqo ilaa 10 daqiiqo. Waxa sidoo kale ardayda iyo shaqaalaha loo oggolaan inay bannaanka uga baxaan waqtiga fasalka casharada ay ku qaadanayaan si ay u tukadaan.
- Marka waalidiinta/daryeelayaasha laga helo codsi qoraal ah, ardayda waxaa suurtagal ah in maalinta Jimcaha ka maqnaan karaan fasaladooda ama barnaamijyada si ay uga qeybgalaan salaad Jimcaha ee Jamaacada ah taasi oo Masaajidada lagu tukanayo.
- Caruurta waajib kuma ah inay soomaan bisha Ramadaan ilaa ay ka qaan-gaarayaan kuna waajibayo. Sidaas darteed, qoysas faro badan, caruuraha yaryar waxa ay ku raaxaysanayaan inay ka qeybqaataan iyada oo lagu dhiirigalinayo inay sii bartaan inay soomi karaan marka ay gaadhaan da’dii soonku ku waajibayey. Waa iska caadi inay

- caruurta yaryar qaarkood ay soomaan maalinta badhkeed, ama maalin ka mid ah maalmaha shaqada laga fadhiyo sida (Sabtida/Axada).
- Macalimiintu waa inay ogaadaan marka ardayda muslimiinta ahi ay sooman yihiin inay ka tamar yar yihiin marka ayna soomaneyn.
  - [Waa kuwan liistada buugta](#) aad ka akhriyi karto bisha Ramadaan si aad wax badan uga barato.

Ramadaan Wanaagsan ayaan u diraynaa bulshadeena Muslimiinta ee PPS!